

Soomaali

Caruurtu waxey xaq u leeyihiin koritaan uu xoog ka maqan yahay



Sawir: Ulrica Törning

VKV – Xarunta kor u qaadka xirfadda ee gobalka Västra Götalandsregionen ee ka shaqeysa arimaha xoog u sheegada xiriirka soke

Halloo!

Qoraalkan waxa loogu tala galay adiga waalidka ah.

Waalidnimadu waa shaqo muhim ah balse shaqo mararka qaar adag oo wadata mas'uuliyad qof kaa saaran yahay. Sida xiriirkaadu sokeeyo yahay ayaa saameyn ku yeelaneysa caruurtaada

Waa kuu sidee adiga?

Welwel ma ka qabtaa ilmo kuu dhow ee ku koraya goob-joogna u ah xoog isu sheegayo reerka ah? Ma jirtaa sabab aad adigu uga hadasho xiriirka reerkiina?

Waxa jira gargaar aad heli karto!



Iswiidhen caruurta badankeedu waxey heystaan nabad-qab iyo koritaan kalsooni leh, laakin waxa jira caruur badan oo ku nool xaalad reero kuwaasoo ay xoog isu sheegasho ka dhex jirto dadka waaweyn. Dhowr ka mida caruurtaan iyaagaba xoog loo sheegtaa, xad gudub galmo iyo dayacid.

Iminka waxan leenahay aqoon wanaagsan ee ku saabsan caruurta, kuwaasoo ku koraya xoog isu sheegasho, taasoo saameyn karta caruurta una keeni karta qatar dheeri ah sida caafimaad daro maskaxiyani iyo waxbarasho xumo.

Marka reerka uu ka dhex jiro xoog isu sheegasho waxa hoos u dhaca fursadda waalidka ee haqab-tirida baahida caruurta ee dhanka amaanka.

Xoog isu sheegashada reerka ayaa abuurta dareemid danbiilinimo iyo ceeb. Badanaa xoog isu sheegashada ayaa noqota sir reerka aan dibedda uga soo bixin. Caruurta xaaladan ku jirta ee xoog isu sheegashada reerka ayaa qofka dibedda ka ah reerka oo soo dhexgala waxey noqon kartaa fursadda kaliya ee wax lagu bedeli karo.


Bogga danbe ee qoraalka waxad ka heli kartaa wadooyinka aad gargaar ku heli karto. Waxa gargaar heli kara adiga iyo qofka aad u welweleyso.

Waxa jira gargaar aad heli karto!

Waxaad mar kasta la xiriiri kartaa rugtaada caafimaa, kalkaalisada caafimaad ee BVC ama adeega bulshada haddii aad dooneyso inaad qof la hadasho. Iyagaa badanaana og cidda aad u baahan tahay inaad la xiriirto haddii aad u baahan tahay gargaar dheeri ah.

Qadka telefoonka ee amaanka dumarka (Kvinnofridslinjen) waxad wici kartaa afar iyo labaatan saac. Adigoon caddeyn qofkaad tahay ayaa wici kartaa wiciduna waa lacag la'aan.

 020-50 50 50
Kvinnofridslinjen



Qoraalkan waxa ka danbeeyey Xarunta kor u qaadka xirfadda ee VKV -
Västra Götalandsregionens
kompetenscentrum om våld i nära relationer